

# Xafladda Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic ee La Casriyeeyey



## Wacaasha Kasoo Korodhay Benson Gu'ga 2024

Dhismaha ayaa galay marxaladihii ugu dambeeyay, waxaana goobta dhamaan buuxiyay hawl. Naashnaashka dhameystirka ayaa ka socda qeybo badan oo ka mid ah dhismaha. Kabadhaha iyo khaanadaha bandhigga ayaa lagu rakibay daaradaha teknoolojiyadana waxa lagu rakibay fasallada dhexdooda. Qalabka farsameynta

agabka guryaha ee cusub ee barnaamijyada Benson Tech ayaa imaanaya waxaana loo qaadayaa qolalka iyada oo ay socdaan hawlaha qurxinta beeraha ee kama dambeysta ah. Wax walba sidii la doonayey bay u socdaan si shaqaalaha & ardaydu ay dib ugu laabtaan bilowga sanad dugsiyeedka 2024-25.

## Meelaha Muhiimka ah ee Naqshadda

- Kadinka hore ee dadka naafada ah iyo dadka aan naafada ahaynba ay kasoo geli karaan ee taariikh ahaan muhiimka ah oo leh ammaan kor loo qaaday iyo daarad-kadin oo xidhan.
- Dhisme-baaleedyo 2-dabaq ah, oo cusub oo ka kooban goobo ay wadaagaan CTE gu iyo goobaha waxbarashada akaadeemiyadeed ee aasaasiga ah.
- Barxad shaqeed CTE ah oo ka kooban goobo shaqo oo la daday iyo fasal bannaanka ah.
- Barkulanno/kafateeriya arday oo meeldhexe ku yaalla oo ku xidhiidhsan barxad xiran oo noqonaysa qalbiga dugsiyeed cusub.
- Casriyeyn hoolka-isku-imaadka ah iyada oo aan waxba laga beddelin sifadiisa taariikheed iyada oo lagu darayo iftiiminta iyo teknoolajiyadaha maqal iyo muuqaalka ah ee ugu dambeeya.
- Qol Bulsheed cusub oo lagu fududeynayo la falgalka ardaydii hore, shuraakooyinka shaqada & bulshada.
- Goobaha isku imaadka ardayda ee loogu talagalay iskaashiga, shaqada kooxaha yaryar, iyo isdhexgalka bulsheed.
- Qolka dhaxalka ardayda hore oo muujin doona qaar ka mid ah farshaxannada taariikheed ee taariikhda xusuusta mudan ee dugsiyeed isla markaana noqda goob ay isugu yimaadaan Ardaydii Hore ee Benson.

## Jadwal-wakhtiyeedka Mashruuca

### GUGA 2019 - XAGAAGA 2021

#### Naqshadda & Rukhsaynta

Naqshada Marxaladda Koowaad / Sameynta Naqshadda / Dukumintiyada Dhismaha/Rukhsaynta

### DAYRTA 2021 - XAGAAGA 2024

#### Dhismaha

Ardayda iyo shaqaalaha si ku meelgaadh ah rarid inta lagu gudo jiro dhismaha.

### DAYRTA 2024

#### Dhamaystirka

Si buuxda loo casriyeeyey Benson waxa uu furmayaa

# Xafladda Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic ee La Casriyeeyey



Kadinka Barxadda Koonfurta oo leh Saqaf Agabka Soolarka ah iyo Laab Bayoolajiyeed

## Dib U Qaabeynta Benson Polytechnic ga Taariikhiga ah

Dhismaha ayaa bilaabmay dayrtii 2021 si loogu sameeyo casriyeyn buuxda Benson Polytechnic. Dib-u-naqshadeynta ayaa waxaa ka mid ah dib u habeyn loogu talagalay dhulgariirta oo ka kooban afar dhismo taariikhi ah oo leh casriyeyn caafimaad & ammaan oo dhameystiran. Jiimka weyn ayaa la casriyeeyey oo laga dhigay hoy xaaladda degdegga ah oo Qaybta IV ah, iyada oo la kaashanayo Barnaamijka Deeqaha Dib U Habeynta Loogu Talagaley Dhulgariirka ee Oregon (SRGP).

Shan dhisme oo gebi ahaanba cusub ayaa la soo kordhiyey oo ka kooban goobo tacliineed casri ah oo waxbarashada mihiinadda iyo farsamada ah (CTE) oo loogu talagalay barnaamijyada dhismaha, warshadeynta, korontada, handasada, mihiinadaha caafimaadka, warbaahinta dijitaalka, cilmiga kombuyuutarka, gawaarida, iyo baahinta.

Kafateeriyada/barkulanada ku yaalla meesha dhexe waxa ay ku xidhiidhsan tahay barxad xiran waana bar xudun ah oo cusub oo kusoo korodhay nololsha ardayga. Xarunta la casriyeeyey ayaa sii wadi doonta in ay ilhaamiso oo soo jiidato jilasha ardayda Portland ee kala duwan.



**Wixii ah macluumaadka dheeraadka ah iyo wacaasha soo korodha fadlan booqo websayt ka Casriyeynta Benson**  
<http://BensonBond.pps.net>

## Dhismaha aan Dunida Waxyeelleyneyn ee Halabuurka leh

Dhammaan xarunta Benson Polytechnic ayaa waxaa la naqshadeeyey iyada oo maskaxda lagu hayo daa'iminta, iftiinka qorraxda ee dabiiciga ah iyo tashiilidda tamarta ee la kordhiyey waxa ay si weyn hoos ugu dhigeen saameynta kaarboonka ee dugsiga. Koox-fallaadheex qorraxeed oo ballaadhan ayaa la filayaa inay bixiso 314 MWh oo tamarta la cusboonaysiiyo ah. Taas marka laga yimaaddo, in ka badan 40 geed oo cusub ayaa la beeray si ay u qabtaan kaarboonka oo ay u kordhiyaan hadhka. Dhismaha ayaa sidoo kale si weyn u dhaafi doona heerka PPS ee LEED Silver ee dhismayaasha dib loo naqshadeeyey.



## Xafladda Furitaanka Weyn

Fadlan nagu soo biir Xafladda Furitaanka ee Weyn ee Dugsiga Sare ee Benson Polytechnic oo si buuxda loo casriyeeyey Sabtida, Sibtambar 14keeda, 2024, laga bilaabo 10gh ilaa 1gd. Waxa ay ka koobnaan doontaa Munaasabad Xadhig Jarid oo gaar ah oo ay ku xigaan jawladdo lagu indha-indhaynayo xarunta cusub.